Tixraaca Dhaqanka iyo Suugaanta

Sheekadani waxay soo baxday 3dii Janaayo, 2007

# MUCJISADII DAAHSOONAYD

Waxaa qorey:
Cabdifitaax Cabbaas Cali

Wixii faallo ah u dir qoraaga, oo ugu hagaaji: saalaxyare@hotmail.com

Mucjisadii daahsoonayd

Waa hore ayaa waxaa jiri jirtay sheeko dad badani maqleen asaan run ahaanshaheeda la ogeyn.

Waxaa la yiri: ``Waxaa jiray dhul aan la aqoon wax ku dhaqan iyo wax ka jira toona, xilliguna aad ayuu uga fogaa maantadaan dunida la inoo sheego dadka ku nool tirsigiisa, bahallada, cayayaanka, iyo dhammaan waxaa noole jira oo dhan tabta ay u nool yihiin. Waxaa la sheegay in ay meeshu ku oollayd bad dhexdeed oo gasiirad yar ay ahayd. Cidina ma ay tegin waligeed sida ay sheegeen dadkii halkaas berriga uga dhawaa oo qiyaastii 300 oo mayl u jiray. Waxaa kaliya ee la maqlay waxaa ay ahayd in nin badmaax ah oo wata tobaneeyo qof uu halkaa beri u hayaamay oo sheegay inuu soo sahamin doono kobtaa iyo waxa ku dhaqan. Waxaa ayaan danbe la maqlay inuu halkaasi jinni iyo wamaa jaan ay foodda isku dareen. La sheeg in 9 ka mid ah dadkaasi le'deen halka mid ka mid ahi uu baxsaday asagoo aan far la saarin oo qolyihii ay kobtaas isku farasaareen iskood u soo daayeen si uu bal dadkiisa uga sheekeeyo halaaggii la baday iyo waxa uu soo arkay intaba.

Ninkii badbaaday ayaa waa danbe u yimid dadkiisii, deetana shiriyey odayaashii guurtida Deegaankaas ugu waa waaweynaa, wuxuuna hadalka u bilaabay sidaan:

``Anagoo 10 Nin ah oo wadanna dooni yar oo annaga iyo raashinkayaga ka badan aan qaadin waa tii aannu aroor hore halakan ka tagnay. Waa tii aad ogeydeen sidii aynu isu macasalaamaynay.Waa tii aad nala dardaaranteen.Waa tii raggiina golaha ayaantaas joogay aad ballan qaaddeen haddii aan soo noqon wayno inaad carruurtayada iyo dadkii aanu masuulka ka ahayn aad masuuliyaddooda qaadi doontaan. Sidaas iyadoo ah waa tii aanu baxnay oo foodda saarnay kobtii aan ku ballanay inaan qabanno ee gasiiradda ahayd. Waxaannu sii soconaba 4 beri iyo dhawr saacadood ayay nagu qaadatay inaanu gasiiradda tagno. Markaanu u soo dhawaanay gasiiraddii ayaa waxaa noo muuqday qudbi dheer oo u eg *tower* ama qudbi masjid, waxaa kale oo indhahayagu qabteen cagaar dhag ah oo geedo waa weyn ah oo gasiiradda daanteeda soo saaran asaad moodid inuu is haysto meeshoo dhan. Waxaa nagu soo baxay meel aad mooddo in doomuhu ku xirtaan oo deked u eg. Waxaan u hollanay inaan ku xiranno halkaa kol haddaan soo dhawaanay. Isla jeer ahaanba waxaa badda nagaga soo baxay yuug iyo wamaayuug wax u eg oo 6 hal ah. Bahal ma uu ahayn, waana u ekaayeen. Hortayada midbaa istaagay. Shan halna dhinacyada ayay naga mareen. Muuqu waa wax weyn oo ballaaran madaxa uga eg dad, addimmo bahalna leh. Ballaarkiisu waxa uu naga qariyey wixii gasiiradda u ekayd. Oo waxaa isku gudbay Kii hortayada taagnaa. Dhinacyadana waxaa naga maray kuwii kale oo waxaanu noqonay wax ku dhex jira goobaabin aan laga bixi Karin.

Waxaannu noqonay wax dayoobay oo lumay, waxaana is qaban wayey wixii hore noogu muuqday iyo waxa hadda na horyaal. Waxaa nagu dhacay argagax iyo amankaag.
Doonta waxaa noo saarnaa raashin biyo nadiif ah iyo hu' aanu huwanno oo dhaxanta ka huwanno. Waxaa kale oo noo saarnaa hub aan ahayn mid casri ah ee laga sameeyey baaruuda qaraxda iyo warmo iyo gaashaan aanu isku daafacno. Waxa meesha ka socdayse waxba kamay tari hayn inay dhibka nagu sii badiyaan mooyee.

Sinnaba uguma aanu hollan inaan la dagaallanno ama iska dhicinno cadawga. Midkii na hortaagnaa ayaa madaxii aadka nooga fogaa ee aad moodaysay inuu cirka biyo ka cabbayo noo soo duwey oo asagoo aad mooddo inuu naga ilaalinayo inuu madaxiisu nagu dhaco, waxa uu noo soo jirsaday wax yar oo taabasho ay gaarto.

Madaxu wuxuu le'ekaa dhawr guri oo la isku furay oo magaalo cammiran ku yaal. Wuu hadlay oo kaaga darane afsoomaali ayuu wuxuu ku yiri" Ma I garanaysaan nimanyahaw?"

Waxaa nagu sii batay argagaxii iyo ashqaraarkii. Sidii aanu is ogayn ayaa waxaanu wada niri "Maya" mid aamusay mooyaane. Mid naga mid ah ayaa aamusay oo aan jawaabin. Waxa uu yiri "ninkaas ayaa i garanaya ee mawaanu idiin kay sheegin?"- "Maya" ayaanu niri inta wada eegnay Ninkii! Intaas markii aanu is weydaarsannay ayuu madaxiisa la laabtay oo bartiisii kula noqday. Ma aanu wada hadlin sidii aanu xerada jin u soo galnay. Waxaa misna noo muuqday wax kale oo sidii gacan oo kale ah, waa nala ka qaatay ninkii aamusay, meel la dhigayse ma aanu arki karin oo baaxadda bahalka ayaa nagu gudbanaa waliba aad noogu dhawaa. In yar ka dib waxaa samada nooga yimid wax sidii daah cad u eg oo magnet wata, halkaas ayaa waxaa na dafay magnetkii oo waxa uu noo waday meel aan la arki karin. Laftayadu xataa isma aanu arki karin oo waanu kala dhunnay sidii dad indhala ama sidii qof toosh indhaha looga ifiyey oo kale ayaanu dayoownay, yaabkiina nagu sii biiray. Waxaa nala sii waday muddo aad u yar oo malaha saacado ah waxaan ku indha kala qaadnay dhul aad u weyn oo ay ku nool yihiin dad ka badan dadkeenna oo dhammaantood wada xiiran oo mid timo ku yaalliin aanu jirin oo dhegi ka go'an tahay. Waxaa dadka dhex fadhiya oday timo leh oo malaha da diisu tahay 50 jir, aad u xooggan oo qaba dhar boqortooyo oo aad u yaab badan. Asaguse dhegihiisu waa ay u dhamaayeen oo midina kama ay go'nayn sidii dadka kale. Kursiga uu ku fadhiyona waxaa ku xardhanaa dahab iyo maar. Laba nin oo aad u xooggan ayaa labada dhinac ka kala taagnaa, mid seddexaadna dhabarkiisa ayuu si dirqi ah uga muqdaa.

Annagu waxaanu nahay sagaal qof waxaa kaliya oo naga maqan ninkii ugu horreeyey ee nalaga qaatay oo asagu aan ka dhex muuqan dadka meesha ka muuqda.

Waxaa hadal bilaabay boqorkii oo yiri: " waxaan ahay boqor Maareeye! waxaan ahay boqorka goobtaan magaceeda la yiraado Yamaarug. Waxaan halakan ku noolaa oo xukun kaan aabahay ka dhaxlay ku hayay 391 sanadood oo sanadka aadanaha ah oo u dhiganta 23 sanadood oo tirsiga dadkayga ah. Waxaan halakan ku hayaa waxyaalo aan oollayn halka aad adinku ka timaadeen. Waxaan maanta idin tusinayaa awoodda alle i siiyey iyo mucjisooyinka aniga ii gaarka ah.
"Waxaan ka mid ahaa 3 walaalo ah oo ilmo boqor ah oo aan anigu ugu yaraa, waxaana na dhashay hooyo kali ah oo waxaanu kala weynayn 15 sanadood oo u dhiganta 255 sanadood oo tirsiga aadanaha ah midkiiba. Anigu 30 sano ayaan ka yaraa kan weyn oo curadka ahaa. Markii aanu wada dhalanay oo aabahayo uu wali dhallinyaro yahay ayaa waxaa xukunkii ku qabsaday adeerkay oo aabbahay ka weynaa oo aan caruur lahayn. Guddigii dadkayaga ayaa arrintaas u diiday inuu boqrtooyada aabahay ka qaato si aany u burburin burjiga iyo jiritaanka boqortooyadu maadaama aanu adeerkay wax dhili jirin oo uu ciniin ahaa.

Sidaas ayaa aabbahayo ku qabsaday xukunka kobtaan. Asagoo hadalkiisii sii wata waxaa uu boqorkii yiri,Yamaarug waa mid ka mid ah 4ta boqortooyo ee ilma YOOFIL ee ku dhaqan dhulweynaha la yiraado Yamays. Waa boqortooyada ugu awoodda yar 4ta boqortooyo oo laba ka mid ah ay ka kala taliyaan walaalahay, midna uu ka taliyo Yay oo ah la taliyihii adoogay. Oo asagu xukunka qabtay 12 sanadood hortood. Anigu waxaan ka masuul ahay dhulkaan Yamaarug iyo wixii agtiisa ka dhoow, sidaa darteed aniga ayaa u xilsaaran wixii ilaaq aadane ah iyo wixii unuunka korkiisa nooga yimaada. Ciidankayga waxaa ugu awood yar kuwii idin soo qabtay, waxaana la yiraadaa Yutulub. Waxaan idin tusidoonaa waxaa ka jira halakan ee bal fiirsha! Waxaa mar kaliya naga qarsoomay dadkii iyo boqorkiiba. Waxaa na saaqday yalaalugo iyo hurdo

wada socda. Waxaan noqonnay dad dayoobay, ammin yar ka dib ayaa waxaa furmay albaab ku beegan halkii uu boqorku fadhiyey, waxaanu galnay meeshii mise waa duni lagu indho daraandaro oo waxaa yaalla aad yaab u dhimanaysid. Waxaanu aragnay waxaa nafta u roon oo dhan hadduu yahay dahab, lacag, cunto, beero, wabiyo, iyo wax aan la soo koobi karin oo dhan. Waanu sii yaabnay, waxaanu u mahadnaqnay ilaahay. Waxaanu is niri boqorku waa nin wanaagsan oo waa uu idinka yaabinayey ee waa uu idin wanaajinayaa deetana idin dayn doonaa.

In yar ka dib ayaa waxaa noo timid gabar qurux badan oo aanu waligayo arag wax la qurux ah intaan noolaa, aadna mooddo in gacanta lagu qoray. waxay noo wadday meeshii wabigu naga xigay, waxay ku dul socotay biyihii, annaguna waanu kula dulsoconnay mana aanu qoyin. Waxaa hoos u furmay kadin kale, markii aanu galnayna waanu ka yaabnay. waxaa joogay makhluuq ka badan kii hore oo uu boqor kale dhex joogo. Sidii kii hore ayuu hadalkii ku bilaabay sidaan:
”Waxaan ahay boqor MUKUL lana dhashay boqor Maareeye, waxaanan idin tusi doonaa wax idin ka yaabiya” markaas ayuu soo qabtay ninkii naga maqnaa oo hortayada soo taagay asagoo qaawan asaan cawro ka muuqan, wuxuu yiri uga sheekee nimankaan siday halakan ku yimaadeen. Waxaa uu hadalkii ku bilaabay sidaan: ”Nimanyahaw anigu ma ahi aadane ee waxaan ka mid ahay dadka boqortooyadan, waxaanan ka maqnaa wax yar oo dhawr sano ah, waxaan ahaa nin u eg sidii kuwa ina soo qabtay oo kale ah, ha yeeshee waxaan sidiina u ekaadaa kolka aan hawl muhiim ah qabanayo oo aan aadanaha dan ka yeelanno. Waxaan magaladiina imid 3 sano oo tirsigayaga ah hortood, habeen la arkana waxaan u soo hoyan jiray kobtaan oo boqorka ayaan warka u keeni jiray. Waxaan ahay ninkii magaaladiinna u sheegay inuu soo sahamin doono gasiiraddii aynu u soconnay, ulajeedkaygu waxaa uu ahaa inaan aadanaha halakan keeno oo boqorka ayaa u baahday shaqo aadane si ay u fuliyaan aan halakan u keeno dad waliba rag ah. Marka ogaada inaad hawl qaban doontaan muhiim ah oo aad noqon doontaan dad hoos yimaada boqor MUKUL sida aniga oo kale. Markaas ayuu boqorkii ul uu haystay ku soo yuubay ninkii mase waa tabtii beledii kolkii hore na heshay oo kale ee madax aadanaha lahaa. Ee meel naga fog ka muuqda asaan boqorkii naga qarin.

Waxaa nagu sii batay yaabkii.

Waxaa hadlay boqorkii oo noo sheegay inaanu arrintaas ka tashanno oo haddii aanu yeelnana uu hawsha noo diri doono oo aanu halakan ku noolaan doonno oo barwaaqdaas ku dhex jiri doonno, haddii aanu codsanno inuu kobtayadii nagu celiyana uu yeeli doono.

Ammin yar ka dib ayaa waxaanu isku afgaranay inaanu boqorka ka codsanno inuu degmadayadii noo cesho si nabad ah . waanu soo laabanay oo boqorkii u nimid, waxaa uu na noo sheegay inuu mid mid u weydiin doono goaankii aanu wada gaarnay. Waxaa nala geeyey 9 goobood oo midba kan kale ka weyn yahay ayna ku dhan yihiin wixii bahal carrada ku noolaa. Nin waliba waxaa uu sheegay wixii lagu ogaa waxaan ahayn. Raggii kale waxay wada yiraahdeen waanu oggolaannay inaanu kula joogno oo boqortooyada ka mid noqonno, aniguse tii aanu isku ogayn ayuun baan sheegay ee ahayd inaan degmadayadii u baahnahay oo waliba anigoo nabad qaba rabo kobtaas. Markaas ayaa waxaa la I geeyey meel kale oo aanana hore u arag oo ka weyn meelihii aanu arki jirnay oo dhan. Waxaa yaallay dhammaan waxa nafta u roon oo dhan. Halkaas ayaa waxaa la igu casumay muddo 7 beri ah oo maalinba meel cusub la I soo daawadsiinayay. Waxaa la I soo baray 2 dii boqor ee dhinnaa, oo ayaguna kaba sii daran kuwii hore. Waxaa la ii ballan qaaday inaan si dhaqso ah ugu tagi doono dadkayga iyo dalkaygiiba. Waxaa kale oo la ii sheegay in nimankii la

geeyey meel loogu talo galay aadanaha kuwa beenta badan oo fulayada ah.

Ammintii la gaaray goortaan ambabixi lahaa ayaa waxaa la I dhex keenay ciidan aan la arki karin meesha uu ku eg yahay iyo halka uu ka bilaabmo oo salaan sharaf Ii saaraya aniga. Deetana waxaa hortayda soo istaagay dooni midab cad leh. Ka dibna waan koray jeer ay daqiiqado gudohood igu keentay meel berrigii dadkaygu ku noolaayeen agteeda ah. Sidaas ayaan ku soo samatabaxay".

Ayaantii u horreysay ee nala kala dooran siiyey inaan joogno guriga belo iyo inaan codsanno in dib naloo celiyo, waa tii aan isku afgaranay in aanan halkan joogi karin fahmina karin sida wax u socdaan oo dunida aakhiro u eg ay nagu adag tahay inaan ku noolaanno.
Inkastoo ay sidaa wax u dhaceen, haddana raggii aanu ballanka lahayn waa ay iiga baxeen ballanka kalideey oo ninkastaa ma uu yeelin tii la isku ogaa ee naftiisa ayuu gaar ula faqay, wixii ay ku heshiiyeenna yeelay, taladeedana qaatay, waxaana ka saayid caleeyey fuleynimadii lagu abuuray oo aniga ilaahay iga fogeeyey.

Markii raggii kale ay isku wada jid mareen oo codsadeen inay joogayaan ayaa ninba meeshii loo asteeyey la geeyey intii bahalladii laga dhex saaray oo hore loogu diray shaqadii loo qoondeeyey.

Aniga markiiba waxaa la igu soo dhaweeyey qoob iyo qaylo wata farxad iyo damaashaad, aan kolkii hore kala saari waayey inay dhab tahay iyo in kale.
Waxaa la i geeyey qasrigii boqortooyada seddexaad. Intaan cid kaleba hadlin waxaa indhahaygu qabteen wax yaab badan, Dhul wada Cagaar ah oo aad ugu eg wixii kolkii u horreysay noo muuqday oo gasiiradda u ekaa. Waxaan dib ugu noqday xasuus anoo is
barbardhiga wixii hore iyo tan iminka hortayda ah.

Qasrigu wuxuu ku dhexyaallaa dhulka doogga ah, Bartanka qasriga ayaa waxaa ka dhisan Kursiga boqorka oo u eg dahab.
Dadka hareeraha ka taagan boqorka si walba uga duwan kuwii hore oo waa dad iyagu ka waaweyn kuwii hore, sida boqorkuba uga xoog weyn yahay labadii boqor ee hore.

Waxaa yeeray dayaan, or ayaa cirka isku toshay. Malaha waa salaan sharaf . Wax badan kama xasuusto hadalladii kor loo lahaa. Waxaa se dareenkaygu soo jeensadey markii uu boqorku hadlay, waayo soomaaliga uu ku hadlay ayaa ahaa mid faseex ah oo cidwalbaa fahmi karto. Ma arag cid soomaali ah oo sidaa afsoomaali ugu hadli karta.
Wuxuu bilaabay hadalkiisii oo yiri:

"Magacaygu waa boqor Mardaadi. Dhul weynahan Yoofil waxaan ahay ninka xukuma

oo ay hoos yimaaddaan afarta boqortooyaba.
Waxaan ahay curadkii boqorkii aabbahay, Markii aannu dhaxalnay boqortooyada waxaa la isku afgartay in aan anigu giddigood boqortooyinka yaryar ee aad soo aragtay wada xukumo si dadban, tanina aniga gaar ii noqoto. Waxaan ku tusi doonaa awoodda gaarka ii ah aniga ee bal dhugo halkan" ayuu yiri boqorkii.
Markaa ayaa waxaa bidhaamay iftiin ka yimid samada oo u eg hillaac meel fog ka soo biligleynaya.
Intaan libiqsanba waxaa hortayda soo istaagay jin. Dhab ayaan u eegay jinkii oo soo jeeda, markiiba waxa uu soo saaray baal ka mid ah baalashiisii. Dusha waa waa gogol xariir ah, waan ku fariistay aniga oo kali ah aanan ogeyna halka aan ku socdo.
Waxaa iga qarsoomay wax walba. Muuqii oo dhanna waxa uu noqday mid buluug ah oo cirka u eg. Muddadii aan sii socday oo dhan waan dawakhsanaa waayo waan harraaday, daalay, oo suuxi gaaray.
Wali garan mayno meel aan ku socdo waxaana igu batay argagixii.
Waxaan sii dhex maray dhul weyn oo iftiin kala googo'an leh ood mooddo cirkii oo xiddigihii ifayaan.
Waan sii dhaafay waxaan markanna imid dhul bad ah oo biyihii la arko, asaan noole muuqan waan sii dhaafnay, waxaan sii marnay dhul wada holcaya oo aad u ballaaran , markaan ku dhaweyn dabkii ayaan baqay oo u qaatay in dabka la igu ridi doono, waxaa isugu kay timid cabsi maankay gadday. Jinkii i wadey ayaa ila hadlay isagoon isoo eegin, waxa uu i yiri: "ha baqin dabku wax ku yeeli mayee".
Intuu hadalka jinku waday ayaan dabkii dhaafnay, markaas ayaa neefi iga soo kuddey.
Waxaa markaan muuqday dhul u eg dhulka soomaalida oo dad deggen yahay, waannu agmarnay dadkii laakiin jinka ayaa ii sheegay inaanay na arki karin dadku oo aanu ka qarsoonnahay.

Waannu sii dhaafnay markaas ayaanu gasiirad horleh aragnay oo iyaduna bad dhexdeed ku taal oo meel fog laga arko buuraheeda. Si dhaqsi ah ayaan ku soo galnay biyihii anigoo wali saaran jinkii.
Dhulka gasiiraddu waxuu u ekaa kuwii hore, lama yaabin markaan, waxaanse yaabay markaan arkay nimankii aan weysanaa oo wada mur ah. Mid dhar xiran lama arko.
Waa ay shaqaynayeen midba shaqo ayuu hayay.
Kii u sokeeyey Geelle ayuu ahaa ina cabdi faras. Ninkii weyda ahaa wuxuu le ekaa daar weyn. Wuu isoo jeedaaliyey ilama uusan hadlinse. Jinkii i waday ayaa ii sheegay in asagu shaqadiisu tahay xog ururin, oo uusan dhaafi karin halka uu joogo, waxaa kaliya ee u yimaada xoghayaasha boqorrada kolkaa ayay ka qaadaan xogtii uu soo aruuriyey oo uu isagu madaxda ka haa. Waxaa taga dhulka soomaalidu degto ragga kale oo iyagu kolba isu ekeysiiya dadka magaalada oo soo xuuraama waayaha dadkaa iyo noloshooda.
Waxay kale oo soo ogaadaan waxa aadanuhu ka aamminsan yahay Mucjisada

daahsoon.

Mar la i tusay sabuurad meel ku dheggen oo ay ku qornayd war laga keenay degmadan iminka aynu joogno, kana tarjumaysa waxa dadkeennu ka aaminsan yahay gasiiradda iyo noolaha ku dhaqan ayaa waxay u qornayd sidaan:

”Gasiiradda waxaa ku dhaqan dad gaagaaban oo dhererkoodu aanay wax badan ka weynayn sumuliga oo kolka aadanaha kuwa ugu gaagaabani ay tagaan halkaa ayaa waxaa laga baqaa in lagu joogsado. Mar uu qarniyadii hore dad halkaa u safreen ayaa waxa ay laayeen tiro dadkii yaryaraa ah, sidaa darteed dadkaasi kol walba waxa ay ku jiraan dhib joogto ah.
Maalinka isniinta ah ee bil kastaa kow tahay ayay isku soo wada baxaan dadkaasi, si ay ilaah uga tuugaan inay waaweynaadaan oo le’ekaadaan aadenaha kale.
Kolkii qof aadane ahi uu xantoobsado dadkaa yaryar ayaa tiradooda lagu sheegaa dhawr boqol oo xabbo.
Nimankii 10ka ahaa ee la waayey waxaa la sheegaa inay boqorro noqdeen oo kiiba dhawr malyuun oo dadkaa yaryar ah u taliyo oo boqor walba dhakadiisa ay ku cayaaraan kumannaan dadkaas yaryar ah.
Magaca dadkaa yaryar waxa lagu sheegay CAWGIIR.”

Waan sii yaabay waayo sheekooyinkaa qaarkood aniga laftayda ayaa haystay intaanan halkaan iman ee waan illaaway oo waxaa i illawsiiyay lama filaankii aan arkay.
Markii aan soo wada arkay nimankii oo ahaa waxa iigu daran ayaa waxaa muuqday wabi qulqulaya, waxaannu raacnay dooni ah mid caadi ah. Waxaan ku soo noqday nolol caadi ah, wax walbana wax weyn kama duwana tii deegaankayga soomaaliya oo kale.
Waxaa la ii sheegay inaan aadi doono Boqor Yey oo ahaa la taliyiihii boqorkii weynaa ee godgalay muddo hore oo ah kii laga dhaxlay boqortooyinkaan yaryar. Waxaan sii soconnay muddo iyadoo cadceeddii aan arko muddo badan ka dib.
Waan farxay inkastoo aanay ila socon raggii kale.
Waxaan mar kali ah soo galnay gasiirad kale oo cammiran. Waxaanan tagnay qasrigii Boqor Yey oo ahaa kii ugu danbeeyey ee aan tago, intaanan tegin xarunta dhexe ee looga taliyo midawga boqortooyinka afarta ah ee YOOFIL.
Waa uu isoo dhaweeyey, i sharfay mudane Yey. Isagu waa oday Waayeel ah oo ragga ka wada weyn oo qawjad ah, ahaana ninkii abbahood ”Boqorkii weynaa” la soo taliyey, deetana lagu sharfay halkaan inuu ka askumo boqortooyo yar asii ka weyn ta ugu yar.
Dadkuu u taliyo waa dad ku mashquulsan aqoon, qayb ayaa ah xiddigiyaal oo dhammaan xiddigiyaasha boqortooyinka oo dhan waxay ka soo aflaxaan dugsiga Boqor Yey. Waxaa aad ka arkaysaa dhan walba sabuurado, Khad iyo loox.
Waan u bogay deegaankiisa iyo jawigaba. Boqorku waa nin cas oo dheer , Waji furan oo aan isla weynayn. Inkastoo uu ku fadhiyo kursi boqortooyo misna dadku agtiisa ayay

Mucjisadii daahsoonayd

fadhiyaan oo loox haystaan, ka qaloon mayaan. Hadal badani ma jiro qof waliba shaqadiisa ayuu haystaa. Waxay ahayd meel xiiso leh.
Waa la i kaxeeyey, waxaan raacay jin kale oo i geeyey xaruntii dhexe ee boqorrada.

Tookadan jinku waa dheereeyey oo wax yar oo aanan dareemin ayuu igu geeyey xarunta.
Mar qura ayaan arkay iftiin, waan ku soo dhawaannay mase meel walba waa dahabi. Waxaa furmay kadin weyn oo u baxay qasriyo dhexdood. Midabka qasriyada, wadada aannu hayno, oogada sare intuba waa midab dahabi ah.
Waxaa mar kaliya soo baxay Ciidan labbisan oo kumanaan gaaraya, isku wada labbis xiran, Qoryo wata, waan sii soconnay waxaa markaa soo baxay halkii ay fadhiyeen Boqorradu, kaalay sheeg goor ay isu yimaadeen, afar kuri oo siman ayay ku fadhiyeen. Waxaa hadlay Mardaadi Oo seef gacanta ku haysta.

”soo dhawoow wiilkiiyoow, maanta waa ayaantii kuugu danbaysay joogitaankaaga halkaan. Berri aroortii waxaad aadaysaa dhulkiinnii, waan kula dardaarmin ee dadkiinna u sheeg  waxaan ku faro. Dhulkan waxaa ku nool ma ahan CAWGIIR ee waa aadane kala duwan oo ilaahay hayin nooga dhigay, dad ayaa ku jira, xoolo ayaa ku jira. Cayayaan ayaa ku jira, kuwo magacooda aydaan aqoon oo ayaa jira.
Waad nabad tageysaaye halkaan dib ha ugu soo noqon, ugana dig dadkiinna iyo cidkastoo wax kaa maqlaysa. Una sheeg inaan la joogno har iyo habeenba”.

Waxaa mar kaliya istaagay 3dii boqor ee kale, waa ay isoo jeedaaliyeen, sooyara foorarsadeen si xushmad leh, afkale ayay misna ku hadleen, tillaabo soo qaadeen misna dib u qaadeen oo kuraastoodii ku laabteen.
Waxaa markali ah iga qarsoomay waxkasta. Waxaana iimuuqatay doonidii i qaadi lahayd ee caddayd, sidaa ayaan ku imid halkaan”.

Dhammaad.

N.B. Waxaa sheekada tifaftiray Jaamac Muuse Jaamac.